


CAABUQA FAYRASKA CAGAARSHOOWGA A

Cagaarshoowga A waa caabug aad u faafa, oo muddo kooban socda kuna dhaca beerka uuna sababo fayraska cagaarshoowga A.

CALAAMADAHA IYO ASTAAMAHA



Juudaanka (indhaha ama maqaarka oo jaalle noqda)



Oomateed la'aan



Calool Xanuun



Lalabo



Matag




Kaadi madoow, saxaro xawiif ah, shubanka



Xanuunka Kala goyska



Qandho



Daal

Haddii aad waajahayso wax kamid ah astaamahaan aadna isleedahay waxaad qabtaa cagaarshoowga A, fadlan wac dhakhtarkaaga (HCP) isla markaba, ama 2-1-1 haddii aadan haysan HCP.